



DUUBISTA IYO FAAFINTA SHARCI DARADA AH EE MUUQAALLADA RABSHADA MUUJINAAYA

Faafinta sharci darada ah ee sawirada gaarka loo leeyahay iyo kuwa xun*, cajaladaha maqalka iyo muuqaalka ah waa dhibaato sii kordhaysa oo ka dhex jirta carruurta iyo dhallinyarada ku nool Norway. Marka wax lagu faafsho internetka, way adag tahay in la tirtiro.


Wadaagista muuqaallada rabshadaha leh iyada oo loo marayo baraha bulshada ayaa u sii balaaran karta dhacdooyin rabshado badan, iyo baahida ku aadan dareen siinta ayaa rabshada ugasii daraysa. Marka la adeegsado baraha bulshada, oonlaynka kama jirto wax xadidaaya meelaha sawirkaasi ku faafi karo.



WELIGAA MA KA FIKIRTAY ...

Xaqiiqada ah inaad faafinaysid muuqaalka dagaal ayaa ka dhigan inaad markale waxyeelo u gaysanayso qofka dhibanaha ah?

Xaqiiqada ah in la ogaado in sawirada cawrada iyo kuwa ceebta ah lagu faafiyo oonlaynka ay kordhin karto dareenka rabshada ee dhibanaha?



SHARCIGA AYAA QABANAAYA, XATAA MOOBILKAAGA GACANTA

Caruur iyo dhallinyaro badan ma yaqaanaan sharciga. Inkasta oo dadka intooda badan ay og yihiin in duubista iyo faafinta muuqaallada rabshadaha leh aysan ahayn wax caadi ah, qaar ayaa laga yaabaa inaanay ogayn in ay sidoo kale tahay dembi.



TANI MA KUGU DHACDAY?

- Hel caawimaad. La hadal qof weyn oo aad ku kalsoon tahay.
- Qaado sawirka shaashada oo ka dhigo caddaynta waxa dhacay.
- Haddii aad hesho muuqaal rabshado ah, ha faafin. Tirtir muuqaalka, haddii aan loogu baahan caddayn ahaan.
- U sheeg dhacdada abka ama webseedka lagu faafshay.
- Haddii aad u baahato talo, la xiriir waaxda booliiska ee arimaha oonleenka ah ama booliiska caadiga ah adoo ka wacaaya 02800.
- Waxaad talo dheeraad ah ka heli kartaa slettmeg.no iyo ung.no (waxay ku qoran yihiin afka Norway keliya).

MAXAY WAALIDIINTU SAMAYN KARAAN?

Haddii ay ka welwelsan yihiin wax oonleenka ka dhacay, carruurta iyo dhallinyarada waa inay ogaadaan inay la hadli karaan waalidkood ama dadka kale ee ay ku kalsoon yihiin.

La hadal carruurtaada, u muuji fahan, weydii su'aalo oo u sheeg cawaaqibka rabshadaha iyo faafinta fidiyowyada rabshadaha. Tani waxay awood u siin kartaa ilmahaaga inuu sameeyo doorasho sax ah.

politiet.no/deleerlikdelta

DELE= DELTA

